# UJEEDADA GUUD

**In la xoojiyo dadka ka soo jeeda beelaha kala duwan si ay ugu guulaystaan oo ay u gutaan kartidooda buuxda iyada oo la siinayo waxbarasho, shaqo iyo adeegyo bulsheed.**

# HIMILADA

Kanada oo barwaaqo ah oo loo dhan yahay waxay ku dhisay tahay guusha shakhsi kasta.

# QIYAMKA

**Hoggaaminta**

- Waxaan u istaagnaa oo aan qaadnaa tallaabo ku aaddan isbeddelka wanaagsan ee bulshadeena.

**Kala-duwanaanshaha**

- Waxaanu qiimaynaa oo ixtiraamnaa kala duwanaanta dadka iyo waxtarka gaarka ah.

**Xoojinta**

- Waxaannu qirsannahay kartida qof walba oo u sahalnaa koboca iyo isku-filnaanta.

**Naxariista**

- Waynu is taageernaa oo wax isku tarnaa.

**Heersarraynta**

- Waxaa naga go'an inaanu aad u hagaajino wixii aanu qabanno oo dhan.

**Cusboonaysiinta**

- Waxaannu jecelnahay isbeddelka, taageernaa horumarinta joogtada ah oo dhiirigelinaa xalal cusub.

**Isla Xisaabtanka**

- Waxaannu qabannaa waxaannu sheegno inaanu qabanayno.

# KUSAABSAN COSTI

Buuxinta baahiyaha bulshada ee kala duwan tan iyo 1952, **Adeegyada Muhaajirka ee COSTI** waa hay'ad bulshada dhaqamada kala duwan u shaqaysa oo siisa shaqaalayn, waxbarasho, deegaamayn iyo adeegyo bulsho dhammaan bulshooyinka muhaajiriinta ah, Kanadiyaanka Cusub iyo dadka kaalmada u baahan.

COSTI waxay ku dadaashaa inay noqoto hoggaamiye u adeegga bulshada iyadoo isticmaalaysa qaab loo-adeegaha diiradda la saarayo, horusocod ah, oo casriyeyn ah xagga qorshaynta, kobcinta iyo siinta adeegyada. Barnaamijyadayadu waxay hubiyaan in iyada oon loo eegayn caqabaha xagga luuqadda ama dhaqanka dadka yimaadda Kanada inay awood u yeeshaan helitaanka macluumaadka, isticmaalaan xirfadaha ay leeyihiin oo ay bartaan qaar cusub oo kordhiya awooddooda inay sida uga ballaadhan oo qoto dheer uga qaybqaataan dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada Kanada.

Ka shaqaynta 18 goobood oo Toronto ah, Gobolka York iyo gobolka Peel, COSTI waxay ku bixisaa adeegyada in ka badan 60 luuqadood. Waxaannu ka caawinay in ka badan 39,000 qof inay helaan kaalmo.

Adeegyada iyo barnaamijyada waxaa ka mid ah:

- Adeegyada shaqaalaynta ee khaaska ah oo loogu talogalay dadka tabobar sare leh, iyo sidoo kale macluumaad iyo u gudbinta adeegyada, qiimaynta shaqaalaynta iyo la-talinta habboon, meelaynta shaqada, tabobarka raadinta shaqo iyo kobcinta shaqada ee dadka waaweyn iyo dhallinyarta.
- Tabobarka Xirfadaha Luuqadda (ESL iyo LINC), Ingiriisiga  iyo barnaamijyada Tabobarka Xoojinta Luuqadda (ELT).
- Adeegyada deegaamaynta oo ay kujiraan wacyigalin, macluumaad, la-talin iyo fasiraad dhaqan oo loogu talogalay muhaajiriinta dhawaan yimid.
- Taageerada deegaamaynta kadib ee muhaajiriinta la deegaamiyey kuwaasi oo wali u baahan adeegyada bulshada iyo dawladda.
- Taageerooyinka guriyeynta iyo deegaamaynta ee Qaxootiga Dawladda Kaalmayso, Dacwoodayaasha Qaxootiga iyo Qaxootiga Sida Gaarka ah Looga Masuulka Yahay.
- La-talinta qoyska iyo adeegyada caafimaadka maskaxda.
- Taageerada guriyeynta ee qoysaska wajahaya in guryaha laga saaro, ama kuwa guri ku filan aan haysan.
- Caawinta dumarka muhaajiriinta si ay uga adkaadaan caqabaha hortaagan noloshooda iyo helitaanka fursadaha.
- Adeegyada sida gaarka ah loogu talogalay baahiyada waayeelka si looga caawiyo inay helaan nolol raaxo iyo sharaf leh.
- Adeegyada turjumaadda.

# TAARIIKH AYAA QORAYSA

Laga soo bilaabo 1952 COSTI waxay heegan u ahayd kuwa baahida qaba. Si wax looga qabto baahiyada muhaajiriinta dhawaan yimid Toronto, COSTI (horay loogu yaqiin Italian Immigrant Aid Society) waxa la aasaasay sanadkii 1952. Toban sano kadib magaaladu way isbeddeshay, jawaabaha COSTI na way is beddeleen.

COSTI waxay ku timid isku-darka, sanadkii 1981, laba hay'adood oo waawayn oo adeeg bixiya, COSTI (oo hore u ahayd Centro Organzativo Scuole Tecniche Italiane) iyo IIAS (Italian Immigrant Aid Society), mid kasta oo ka mid ah wuxuu taariikh dheer oo adeeg ku dhex lahaa bulshada muhaajiriinta ah.

COSTI waa urur dhaqamo kala duwan oo mar walba bixiya adeegyo iyo fursado kala duwan oo ku yimaadda baahiyaha gaarka ah ee bulshada dhexdeeda. Waxay taageero xooggan ka heshaa degmo aad ugu kala duwan dad ahaan oo Toronto ku taal iyo Gobolada Peel iyo York. COSTI waxay noqotay ururka maanta ay tahay sababtoo ah hoggaamiyayaasheeda isdirayaasha ah iyo shaqaalaha naxariista badan ayaa ku shaqeeyey ballanqaad xooggan si ay isbeddelaan u sameeyaan.

## 1950-kii - Aasaasidda Dhaqanka Caawinta Dadka Kale

Markii la aasaasay 1952, IIAS waxay usoo baxday sidii urur ujeedadiisu ahayd inuu siiyo dadka cusub ee Talyaaniga ah baahiyaha aasaasiga ah ee nolosha. Iyagoo kula kulmaaya muhaajiriinta Xarunta Ururka ee Toronto, shaqaalaha IIAS waxay ka caawin jireen guryaha iyo shaqada, waxayna ku dari jireen wacyigalinta iyo la-talinta loogu talogalay in laga caawiyo dadka dhawaan yimi inay noqdaan qaar ku raaxaysta waddankooda cusub.

## 1960-kii - Xoojinta Xiriirka ku Aaddan Bulshada

Toban sano kadib, 1962-dii, COSTI waxaa loo aasaasay inay ku caawiso muhaajiriinta dhawaan yimid ee Talyaaniga ah inay helaan shahaadooyinka xirfadeed ee looga baahanyahay si ay ugaga shaqeeyaan xirfadahooga Kanada. Bilawgii hore ee hawlgalkeeda, barnaamijyada COSTI waxay ka jireen kiniisad ku taala Toronto, markii dambe iyadoo u guurtay dhisme duug ah oo aan la isticmaalin oo ku yaala 136 Beverley Street.

Si loogu diyaariyo dadka waddanka u soo guuray imtixaanada luuqadda Ingiriisiga ee looga baahan yahay inay gudbaan si ay uga shaqeeyaan Kanada, shaqaalaha COSTI waxay abaabuleen barnaamijyo barashada luuqada Ingiriisiga ah. Iyadoo tirada macaamiishu kordheen, waxa la ogaaday in baahida la-talinta xirfadeed oo kaliya ku filnayn, laakiin sidoo kale loo baahan yahay la-talin guud iyo qoys.

Barnaamijyada laga bixiyo COSTI waxay isla markiiba kordhiyeen xarumahooda, ururkuna wuxuu bilaabay inuu la shaqeeyo xarumo waxbarasho oo kala duwan oo aagga ka jira. Sanadkii 1966-kii Workers’ Compensation Board (hadda loo yaqaano Workplace Safety and Insurance Board) ayaa heshiis la galay COSTI si ay u bilawdo barnaamij lagu baxnaaninayo shaqaalaha dhaawacmay. Barnaamijkani si wayn ayuu u kordhay, wuxuuna saamayn ku yeeshay nolosha shaqaale badan oo dhaawacmay sanooyin badan.

### 1960-kii – Way sii socotay

Dhammaadkii 1960-kii, hay'addu waxay ka furatay xafiisyo la-talin dhammaan Toronto, Hamilton, iyo daafaha Waqooyiga York. Waxay sidoo kale ku dhawayd wakhtigan in COSTI ay ka noqotay xubin hay'adeed United Way, waxayna bilawday ballaadhinta adeegyadii ay u haysay dadka muhaajiriinta ah ee ka yimid wadamada kale marka laga reebo kuwa ka yimid Talyaaniga.

### The 1970-kii – Kala-duwanaansho Dhaqanimada

Intii lagu jiray 1970-kii, adeegyadii COSTI ayaa mar kale la ballaadhiyay si loogu daro gargaarka loogu talogalay qaxootiga imanaya Kanada. Iyadoo aqoonsan baahida adag ee qaar badan oo reer Fiyetnaam ah "dadka doonta" ee in la xaqiijiyo heerkooda waxbarasho ee dhabta ah, COSTI waxay soosaartay imtixaan iyo hannaan shahaado-siin iyada oo kaashanaysa George Brown College, oo ah barnaamijkii noociisa ah ee ugu horreeyey Kanada.

### 1980-kii - Aragti la Wadaago

Iyadoo la qirayo isku mid ahaanshaha ahdaafta iyo shaqada ee IIAS iyo COSTI, wada-hadal ayaa bilaabmay 1980 si loo mideeyo labada hay'adood. Janaayo 24, 1981, hadafkani waa la gaaray waxayna ururadu ku midoobeen magaca rasmiga ah ee COSTI-IIAS Immigrant Services (Adeegga Muhaajiriinta ee COSTI-IIAS).

### Sanadkii 1990-kii - Cidhibtirka Caqabadaha

COSTI waxay soo martay marxalado aad cajiib u ah oo koritaan iyo horumar intii lagu jiray 1990-kii. Iyadoo xoogga la saaraysa wax ka qabashada baahiyaha Xirfadlayaasha sida Fiican u Tabobaran, COSTI waxay ahayd muhiim inay bixiso hoggaamin bulshada dhexdeeda, iyadoo adeegsanaysa soosaarista habab gaadhsiinta adeegga oo gooni ah kuwaasi oo xalliyey baahiyaha dadka imanaya Kanada iyagoo leh waayo-aragnimo shaqo oo caalami ah. Waxaa la aasaasay sannadkii 1997 waana kii ugu horreeyay ee noociisa ah, Xarunta COSTI ee Xirfadlayaasha sida Fiican u Tabobaran (Centre for Internationally Trained Professionals) waxay siisay xirfadlayaasha waayo-aragnimo xoog leh oo xagga shaqada ah oo ah qaybta ay khibradda u leeyihiin.

### 2000-kii - COSTI iyo Bulshada

Iskaashiga COSTI iyo wada-shaqaynta bulshada ay la leedahay waxay si wayn kor ugu kacday intii lagu jiray 2,000-kii. Ururku wuxuu martigeliyay oo abaabulay kan ugu horreeyay African Canadian Council (Golaha Dadka Afrikaanka ah ee Kanada) sanadkii 2001, isagoo iskugu keenay 51 urur oo Afrikaanka u adeegga iyo xubnaha bulshada shir si ay uga wada hadlaan baahida qorshayn iyo isku duwid tan ka wayn oo xagga adeegyada bulshada koraysa la siinayo ah. Natiijada shirka ayaa ahayd abuurista African Canadian Social Development Council, oo shaqadoodu ahayd in ay isku duwaan adeegyada, siiyaan tabobar iyo u-doodid siyaasad guud oo waxtar badan leh. COSTI waxay u dhaqantay sida loo wakiishay.

Sanadkii 2007, iyadoo ay weheliyaan afar hay'adood oo kale oo wadashaqeeyaan, waxa la sameeyay habka iskaashiga ee Adeegyada Muhaajirka Xarunta Soodhawaynta (Welcome Centre Immigrant Services). COSTI waxay ahayd hoggaanka xarunta koowaad ee Vaughan. Afar meelood oo dheeraad ah ayaa la furay sanad kadib, mid kasta waxa hoggaaminayey mid ka mid ah afar la shaqeeyayaal kale. Adeeg dhammaystiran ee York Region, Welcome Centre Immigrant Services Centres waxaa loogu talogalay inay si toos ah wax uga qabtaan baahiyaha deegaamaynta dadka cusub. Intaa waxaa dheer, iyadoo aqoonsan baahida sii kordhaysa ee la-talinta qofka iyo kooxda ee bulshooyinka ku hadla Bortaqiiska iyo kuwa ku hadla Isbaanishka, COSTI waxay ballaadhisay adeegyadeeda qoyska iyo caafimaadka maskaxda ee bulshooyinka la siiyo 2008.

## Immika - Kordhinta Kaqaybgalka

Iyadoo hadda loo yaqaan Adeegyada Muhaajirka COSTI, ururku wuxuu ballaadhiyey ilaa heer uu sanadkii kaalmeeyo in ka badan 39,000 oo qof oo dacallada adduunka ka kala yimid. In kastoo bartilmaameedkiisa koowaad wali yahay muhaajiriinta dhawaanta yimi, barnaamijyada COSTI waa la ballaadhiyey si adeegyo loo siiyo dhammaan dadka waaweyn, dhallinyarta, iyo haweenka dhibaataysan.

Iyadoo adeegsanaysa shaqaalaheeda ka badan 400, oo guud ahaan ku hadla in ka badan 60 luuqadood, COSTI waxay awoodaa inay gaadho bulshooyin kala duwan si ay u keento isbeddel wanaagsan.

Wadashaqaynta iyo iskaashiga COSTI la leeyahay bulshadu wuu sii socdaa iyadoo la aasaasay barnaamijyo gobolka oo dhan ah sida Orientation to Ontario Program, oo la aasaasay sanadkii 2011, International Student Connect and the Neighbours, Friends and Families ololaha waxbarashada dadweynaha si kor loogu qaado wacyiga ku saabsan calaamadaha xadgudubka haweenka loo gaysto.

COSTI waxay si joogto ah ugu dadaashaa inay noqoto hoggaamiye adeegga bulshada iyadoo isticmaalaysa qaab loo-adeegaha diiradda la saarayo, horusocod ah, oo casriyeyn ah xagga qorshaynta, kobcinta iyo siinta adeegyada. Barnaamijyadeedu waxay hubiyaan iyadoon la eegayn caqabadaha luuqadda ama dhaqanka, dadka yimaadda Kanada inay awood u yeeshaan inay isticmaalaan xirfadaha ay leeyihiin, bartaan qaar cusub, oo si firfircoon uga qaybqaataan dhammaan dhinacyada nolosha ee reer Kanada.

## Shaqadayada Qaxootiga iyo Jawaabta Kanada ee Qalalaasaha Qaxootiga Suuriya

Maadaama ay tahay urur siiya adeegyo muhaajiriinta, iyo bulshooyinka ay ku dhex noolyihiin, COSTI waxay si qotodheer uga qaybqaadatay ka jawaabcelinta qaxoontiga Suuriya ee Kanada, iyo weliba gaar ahaan deegaanka Torontada Wayn (Greater Toronto), iyadoo gacan ka gaysatay inay Kanada dagaan in ka badan 2,200 oo qaxooti Suuriyaan ah ilaa 2016. Sida cid kale oo kasta oo doorata inay ku noolaato Kanada, waxaanu si taxadar leh uga shaqaynaa hubinta in muwaadiniinta cusub ee Kanada ay dhexgalaan bulshooyinkooda oo ay guulaystaan.

Wakhtigan, COSTI waxay wali sii waddaa inay la shaqayso Qaxootiga Dawladdu Kaalmayso, Qaxootiga Sida Gaarka ah Looga Masuulka Yahay iyo Dacwoodayaasha Qaxootiga, iyadoo hubinaysa in taageerooyinka iyo adeegyada la siiyo, kordhiyaan dhexgalistooda bulshooyinkooda deegaanka iyo waddankooda cusub.